Fariin Ka Imanaysa Guddoomiyaha Waxbarashada

Sida loo qeybgalo dimuqraadiyadda Mareykanka waa mid leh siyaabo badan oo looga qeybgalo loogana qeyb qaato. Waxaan ku jirnaa xilli ay sii kordheysa kala qeybsanaanta bulshada dhexdeeda, da' yarta dhalinyarada ah oo dalbanaya xisaabtan dhinaca midabka, masiibada caalami ee ah cudurkani faafaya, dhibaatada dhaqaale, iyo hanjabaad rabshado wata oo sii socda. Doorashada madaxtinimada ee sanadkii 2020 iyo wixii ka dambeeya ayaa iyadu u ah tijaabo shacbigeena iyo dalkeena. Waana xujo nafteena ina hortaa cida aynu nahay iyo waxa aynu rabno inaan qabo mustaqbalkeena?

Marka aynu nahay aqoonyahanka macallimiinta, waxa aynu aaminsanahay in aynu haysano fursad iyo mas'uuliyad ina saaran sidii aan u taageeri lahayn ardaydeena (kuwaasi oo intooda badani wali gaarin da'dii lagu codeynayey) sidii looga caawin lahaa inay u fahmi lahaayeen sida ay u shaqeyso dumuquraadiyadu, lana xaqiijiyo sidii ay u heli lahaayeen inay arrimaha taagan si aqoon hufan leh u fahmi lahaayeen, iyo in lagu taageero inay fahmaan natiijada doorashada.

Waxaan ina saaran mas'uuliyad aan ku hubineyno in ardaydeena ay fahmaan inay lagama maarmaan tahay ka qaadashada dimuqraadiyadeena iinay horumar gaarto. Mar kasta oo ay ardaydeenu wax badan ka ogaadaan dhismaha nidaamyadeena dawladeed, ayay si aad ah ugu sii diyaar garoobayaan inay ka qaybqaataan doodaha bulshada ah ee muhiimka wanaajinta bulshadeena dhexdeeda. Intaa waxaa sii dheer, qiyamkeena sinnaanta jinsiyada iyo cadaalada bulshada ayaa nooga baahan inaan siino manhaj iyo tilmaam dhaqan ahaan ka jawaabaya. Waa inaan ka caawinaa ardayda sidii loo horumarin lahaa miyir-qabka iyo wacyiga bulshada si looga hortago caddaalad darrada loona carqaladeeyo sinaan la'aanta iyo cabudhinta koox kastaa isku daydo. Waxbrashada Dadweynaha waxay noqon kartaa mid maanta ka hortag u ah ilbaxnimada la'aanta inta badan aan ku aragno doodaha siyaasadeed. Waxaan leenahay xirfad iyo tababar si aan u taageerno ardayda markay horumarinayaan fekerkooda muhiimka ah iyo xirfadaha awood-siinta.

Hadda waxaan uga sii badanahay, waxaan u baahanahay jiilka soo socda ee hogaamiyaasha si aan u muujino astaamaha lagu qeexay aragtideena, mala awaalkeena PPS. Wadnaha aragtideena waa Sawirka Qalinjabinta. Waa balanta aan siinay ardaydayada iyo qoysaskeenna. Xilligan la joogo, ardaydeena waxaa loogu yeeraa inay maraan oo ay la qabsadaan caqabadaha murugsan, iyo saddex walxood oo ka mid ah sawirka qalin-jabinta ayaa si gaar ah loo adeegsan karaa:

- **Arday Adkaysi iyo Qabatin Leh ,** ardaydaasi oo la qabsan kara culeysyada iyaga oo si joogta ah u raadinaya inay guuldarada u bedelaan guul lana qabsadaan jawiga ama isbedelada socda. Si loo abuuro bulsho leh dhaqan xoogan lana horumariyo isku xirnaanshaha isbahaysiga sidii la isku gargaari lahaa iyada oo la sii wadayo xirfadaha koritaan barashada caqabadaha iyo inuu qofku ka midho dhaliyo wixii qof ahaan higasanayo.

- **Dib u milicsi, Naxariis Leh,iyo Awood siinta Qalin-jabiyaasha** taasi oo ah inay ardaydu muujiyaan naxariisa, fiirsasho fog leh, ixtiraam, iyo xiisana u qaba aragtida ardayda kale. Waxa ay raadiyaan sidii ay ardayda kale loo xoojin lahaa iyaga oo la aqbalayo, loo mahadnaqyo, iyo in naxariis loo muujiyo ardayda kale.

- **Isbedelada Hoggaamiyaasha Sinaanta Jinsiyadaha** taasi oo ay ardaydu ku fahmayaan sida bulshooyinkeena ay raadka ugu reebtay cadaalada darada dhinaca asalkoodu meesha ay ka soo jeedaan, kuwaasi oo aqoonsan karaya xaaladaha caqabadaha ay wax ka qaban karaan. Waxa ay dib u furfuri karaan sheekadii ay kalida ku ahaayeen inay soo bandhigaan sharaxeeda iyaga oo u bedelaya mid aad u dheelitiran oo ay cid waliba ay qeyb ka tahay. Maadaama ay u heelan yihiin xal u helida dhibaatooyinka sinaanta jinsiga, waxa ay qabtaa kulano bulshada ay kula sheekeysanayaan oo ku saabsan arrimaha cadaalada bulshada iyo sidii loo caawin lahaa horumarinta iyo meel marinta xalalka ixtiraamaya dhaqanada kale aragtiyahooda.

Waxaan rabaa inaan dhammaan ku dhiirigaliyo dadka qaangaarka ah ee bulshadeena PPS inay isticmaalaan keydkeena adkaysiga si aan u taageerno ardaydeena waxbarashadooda iyo ka hadalka xaalada waqtigan dimuqraadiyadeena. Waxaan waligayba si xoogan u aaminsanahay awooda dimoqraadiyada iyo doorkeena barayaasha sidii aan u taageeri lahayn. Haddii aan dooneyno inaan tooshka u sidono isbeddel wax ku ool ah oo isbeddel keena, waa inaan la dagaallannaa macluumaadka khaldan ee waxbarashada oo aan taageernaa mabaadii'da dimuqraadiyadda caddaaladda ku dhisan. Waxaan rabaa inaan sii wado adkeynta muhiimadda wada jirka qof kasta oo ka tirsan bulshadeenna PPS ay isu yimaadaan si ay isu taageeraan. Marka la aqoonsado isku-tiirsanaanteena, waxaan sii wadi karnaa inaan sii xoojino nidaamka iskuulkeena si ardaydeena loo xoojiyo loona diyaariyo dhammaan caqabadaha na hor yaalla.

Waxaan cusbooneysiinay oo aan waafajinnay Qalabkeenna Doorashada ee 2020 oo ku saabsan Ka qeybgalka Madaniga iyo Rabshadaha: Qalab loogu talagalay Adkeysiga iyo Awood-siinta. Waxay ka kooban tahay macluumaad, hagitaan, iyo ilo lagu caawinayo shaqaalaha u diyaar garowga caleemo saarka iyo wixii ka dambeeya. Qalabkan wuxuu ka kooban yahay dulucda filashooyinka shaqaalaha, helitaanka casharka kor loogu qaadayo aqoonta macallimiinta ee la jaan qaadaya sawirkeenna qalin-jabinta, doorashooyinka iyo aqoonta bulshada, aaladaha horumarinta xirfadeed ee barayaasha, buugga tageerada gudaha iyo dibedda ee ardayda, Tilmaamahayaga Hadalka Siyaasadda iyo Nidaamka loo maro Hadalka Nacaybka Xambaarsan ee Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyo liis dheeraad ah kaasi oo ah taageerooyinka shaqaalaha la siinayo. Agabkami waxaa sidoo kale laga heli karaa Bogga Maamulka PPS ee Bogga wuuna sii socon doonaa iyada oo mar walba la cusbooneysiin doono.

Guadalupe Guerrero
Guddoomiyaha Waxbarashada(Superintendent)